

# Ku hel **WAXBADAN** Passport-ka



Qalbi wanaagsan,  
marka baahida  
ugu badan  
loo qabo



**PASSPORT  
HEALTH PLAN**

BY MOLINA HEALTHCARE

# Waxaan Diyaar u nahay inaan ku Caawino ADIGA!

Marka aad su'aal ka qabto gunada, dhakhtarkaaga, dawooyinka ama helitaanka khayraadka kaa caawinaya inaad bixiso kharashka, cuntada ama guryaynta, **diyaar ayaanu kuu nahay**.

Xubin shaqaalaha Adeegyadeena ayaa diyaar u ah inay kaa caawiso inaad jawaabo u hesho waxa aad u baahan tahay. Waxa aanu nahay dad dadka daneeya kuwaas oo caawinayay dadka sidaada oo kale ah mudo 20 sano ah. Waxa aanu ku naalnaa halkan Kentucky oo waanu naqaanaa sida ay wax u shaqeeyaan halkan. Waanu ku caawin karnaa talaabo kasta!



## Nala soo hadal hadii aad:

- Qabto su'aalo ku saabsan gunooyinkaaga ama sida Passport u shaqeeyo
- Waxa aad doonaysaa inaad badasho adeeg bixiyahaaga koowaad ee daryeelka (PCP)
- Waxa aad u baahan tahay kaadh Aqoonsi Passport cusub
- Waxa aad doonaysaa inaad eegto u qalankaaga
- In boosta laguugu soo diro kharashkaaga caafimaadka

## Xubin ayaad tahay miyaa?

Nagala soo hadal 800-578-0603 (TTY isticmaale 711) wixii Adeegyada Xubinta.

## Xabin aan ahayn?

Nagala soo hadal 844-778-2700 (TTY isticmaale 711) si aad macluumaad dheeraad ah u ogaato.

# Yaa la siiyaa Passport-ga?

- Shakhsiyaadka, qoysaska, iyo caruurta buuxiya shuruudaha dhakhliga gobolka\*
- Xubnaha Uurka leh
- Dadka ah da'da, indhaha la' ama laxaadka la'
- Caruurta ku jira KCHIP (Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Caruurta Kentucky)
- Dadka u qalma Medicaid iyo Medicare (u qalan labadaba ah)
- Caruurta laxaadka la'

\*Shuruudaha dakhliga gobolku way is badalayaan. Macluumaadka ugu danbeeya, nala soo hadal.



# Maxaa la bixinayaa

waxaad eegta qaar ka mid ah dheefaha ugu wayn ee aad ku leedahay xubnimadaada!

## Gunooyinkaaga La Bixinayo

- Booqashooyinka dhakhtarka
- Booqashada caafimaad Taleefanka
- Daryeelka kahortaga (talaal, shaybaadh, Shaybaadhka Pap, shaybaadhka dhiikarka iwm.)
- Dawo La Qoro
- Ilkaha & Indhaha
- Adeegyada Xarunta Caafimaadka Maskaxda Bulshada
- Jidhka Isboortiga & Dugsiga
- Booqashada Chiropractor
- Daryeelka Degdega ah
- Dhigaalka Isbitaalka Bukaankii Jiif ahaan
- Agabka Caafimaadka Cimriga Kordhiya
- Booqashooyinka Qolka Gurmadka Degdega ah
- Gaadiidka Aan Degdega ahayn
- Qorshaynta Qoyska
- Daawaynta Jidhka, Shaqada, Hadalka
- Caafimaadka Maskaxda Bukaankii Socodka & Adeegyada Balwadaha

Waxaad Leedahay Caymis!

**MAJIRTO  
Wada Bixin!**

Wixii liiska dhamaystiran ee gunooyinka ah, fadlan waxaad eegtaa **Buugyaraha Xubinta ee Passport** [passporthealthplan.com](http://passporthealthplan.com) ama la hadal.



# Ku hel WAXBADAN Passport

Ma waxaad rabtaa inaad wax badan barato?  
Waad haysaa! Marka laga tago dhamaan gunooyinka wanaagsan ee aad ku heleyso Passport, xubnaha Passport sidoo kale waxay ku heli karaan:

- **Telefoon BILAASH AH** – Telefoon BILAASH AH oo leh Hadal aan Xadidnayn & Fariin Qoraal ah lagu daray 4.5 Dhaato ah, bilaash ah bil kasta
- **Dadka waawayn waxay helayaan \$100 oo muraayado ama leensiska indhaha ah** 24-kii bilood ee kasta
- **Muraayado BILAASH ah** Caruurta & Dhawr iyo Toban jirka ka yar 21 jirka
- **Daryeelka Neefsiga** – Passport waxa uu bixiyaa daryeelka neefsiga si uu daryeelahaaga ugu horseedo inuu ka ladnaado iyo wakhti uu naftiisa daryeeli karo oo uu ku nasan karo
- **La Socdaha Miisaanka** – Inaad hesho 13 todobaad oo La Socdaha Miisaanka oo bilaash ah
- **Kaadhka Qiimo Dhimista CVS** – waxaad badbaadisaa 20% kulnkii shay ee daryeelka caafimaadka
- **Dawooyinka Aan La Qorin oo BILAASH ah** – (kaliya waxaa loo baahan yahay warqada uu dhakhtarku kuu qoray).
- **GED Prep iyo Shaybaadh BILAAH ah** (\$120 wixii ah) – lagu daray \$50 kaadh hadyad ah marka aad ka gudubto!
- **Mobile App, Daaqada Xubinta Onlineka ah, Ogaysiinta Qoraalka & limeelka ah** kuwaas oo haboon, oo ku xasuusinaya oo kuna siinaya tilmaamo ku saabsan daryeelka caafimaadka, gunooyinka iyo u qalanka.
- **24-Saac Khad Kaalmo ah** – adiga ayaan halkan kuu joognaa 24/7. Waxaad la hadli kartaa:
  - Khadkaayaga Talada Kaaliyaha Caafimaadka **1-800-606-9880** wixii talooyin caafimaad ah.
  - Laynka Mushkilada Caafimaadka Habdhaqanka **1-844-800-5154** hadii aad leedahay mushkilad caafimaad oo maskaxda ah.
- **Kaadh Hadyad oo BILAASH AH** \$10 ilaa \$50 – Hel lacag abaalmarin ah kaadh hadyad ah marka aad booqato dhakhtarka oo aad doorasho caafimaad ah samayso. Booqo [www.passporthealthplan.com](http://www.passporthealthplan.com) wixii liiska dhamaystiran ee abaalmarinta ah ama nala soo hadal.



# Adeeg Bixiyahaaga Koowaad Ee Daryeelka (PCP)

Mid kamid ah waxyaabaha ugu wanaagsan ee aad u qaban karto caafimaadkaagu waa inaad hesho Daryeelka Caafimaad Bixiye Kowaad ama PCP. Xubin ahaan Passport ah, waxaad dooran kartaa PCP kaaga oo noqonaya dhakhtarkaaga kowaad. PCP-gaagu wuxuu baran doonaa taariikhdaada caafimaadka, waxa uu daryeeli doonaa badanaa baahidaada caafimaadka, oo wuu ku gudbin doonaa marka aad u baahan tahay.

Magaca PCP-gaaga waxaa lagu qori doonaa kaadhkaaga Aqoonsiga Passport. Hadii aad doonayso inaad aragto PCP kala duwan, waxa aad mid aad leedahay! Waxa aad badali kartaa PCP-gaaga adiga oo la hadlaya Adeegyada Xubinta ee **1-800-578-0603**.

## PCP kee ayaan dooran karaa?

Waxa aad dooran kartaa PCP kasta oo ku jira liiskeena balaadhan ee dhakhtarada adiga oo booqanaya **passporthealthplan.com**. Waxa aad sidoo kale la hadli kartaa Adeegyada Xubinta oo waxa aanu kaa caawin karnaa inaad hesho mid baahidaada ku haboon.

Waxa aad dooran kartaa mid kamid ah PCP ee qoyskaaga dhan ama waxa aad dooran kartaa PCP kale xubin kasta oo qoyska ah. Waxa aad dooran kartaa mid kamid ah kuwan:

- Bixiye guud ama dhakhtar
- Bixiye qoys ama dhakhtar
- Kaaliye Caafimaad
- Kaalmo Jidh
- Dhakhtarka Gudaha
- Dhakhtarka Caruurta
- OB/GYN





# PCP-gaagu waxaa Weeye Gurigaaga Caafimaadka

Cidna u baran mayso caafimaadkaaga sida PCP-gaagu u baranayo oo kale. Waxa aad ka fikirtaa inuu PCP yahay **Caafimaadkaaga Gurigaaga** — meesha sida wanaagsan kuu taqaan!

Waxa aad samaysaa balan booqasho PCP-gaaga ah isla markaba, xataa hadii aanad xanuusanaynin. Booqashadan badqabku waxaa weeye qaab wanaagsan oo aad ku noqon karto bukaan cusub oo aad xidhiidh kula samaysanayso PCP-gaaga. PCP-gaagu wuu ku baran doonaa oo waxa uu qorshayn doonaa sida ugu wanaagsan ee lagu daryeelayo.

Ma jiro wax ka muhiimsan inaad hesho dhakhtar aad ku kalsoonaan karto. Mudo kadib, waa inaad ku raaxaysan karto oo aad PCP-gaaga u sheegi karto wax kasta oo ku saabsan walaacyadaada caafimaadka.

## Waxyaabaha ay tahay In La Xasuusto

- La hadal xafiiska PCP-gaaga wakhti kasta oo aad su'aal ka qabto caafimaadkaaga ama daryeelkaaga caafimaadka. Waxaad aad soo hadli kartaa 24 saacadood maalintii, 7 maalmood todobaadkii. Hadii aad soo hadasho saacadaha ka baxsan shaqada, dhakhtarkaaga ayaa kugu soo celin doona. Hadii aad u baahan tahay talo caafimaad, waxaad sidoo kale soo waci kartaa Daryeelkayaga wixii ah Khadka waanada Kalkaaliskaaga 24/7 **1-800-606-9880**.
- Marka aad u baahan tahay inaad la kulanto PCP-gaaga, waxa aad ula hadli kartaa xafiiska dhakhtarka si balan laguugu qabto. Wakhtiga balantaadu waa muhiim, markaa ilaali.
- Hadii aanad ku iman karin balanta, lasoo hadal xafiiska markaba si aad ugu sheegto. Waxa aad isku daydaa inaad xafiiska 24 saacadood kahor u sheegto.
- Soo qaado kaadhkaaga Aqoonsiga Passport mar kasta.
- Hadii aanu Ingiriisigu ahayn luuqadaada kowaad, waxa aad dalban kartaa adeegyada turjubaada marka aad booqanayso ama la hadal PCP-gaaga.

# Taageero Bilaash ah 24/7

Waxaad heli kartaa kaalmo baahiyahaaga caafimaadka maskaxda iyo habdhaqanka ah 24 saacdoood maalintii, 7 maalmood todobaadkii. Waxaad wici kartaa wax kamid ah lambaradaan:

- **Khadka 24 saacdoood ee Kaaliya Caafimaadka**  
1-800-606-9880  
TTY: 711
- **Laynka Masiibada Caafimadka Dhimirka 24 saacadoo shaqeeya**  
1-844-800-5154  
TTY: 711






# Daryeelka Degdega ah

Qabo qolka gurmada degdeg ah (ER) hadii ay jiraan xaalad caafimaad oo markaa khatar gelinaysa noloshaada ama waxyeelo wayn gaadhsiin karta caafimaadkaaga hadii aanad marka daryeel helin. Shaqaalaha ER-ga ayaa go'aamin doona sida dhakhsaha ah ee laguula kulmayo. Waxa ay ku samaysnaan doontaa baahidaada caafimaadka.

## Tusaalayaal Goorta La Isticmaalayo ER

- Nabur xun ama gubasho
- Dhicin (uurka ilmaha ku jira oo soo dhaca) ama uur iyada oo la leeyahay oo xubinta taranka laga dhiigo
- Dhaawac madaxa ama indhaha ah
- Khatar nafta ah ama kabuubyo (gacmaha ama lugta)
- Xanibaad
- Shil gaadhi oo dhaawac keena
- Laab xanuun
- Neefta oo ku qabata
- In lagu gacan qaado ama lagu kufsado
- Neefsiga oo ku dhiba
- Dhiigid aad u badan
- Hadalka oo kaa xidhma
- Qaadasho dawo ama mukhaadaraad badan (tandhaafin)
- Baralaati (aan awoodin inuu dhaqaaqo)
- Sun
- Laf jaban



### Miyaad ka shakiday inaad ku jirto xaalad degdeg ah?

Waxaad sidoo kale soo wiici kartaa Khadkayaga 24/7 ee Talobixinta Kalkaasida oo ah ee 1-800-606-9880.

# Dawooyinka Laguu Qoray Waa La Bixiyaa



Passport waxa uu bixiyaa dawooyin badan oo laguu qoray oo kharash yar aad ka bixinayso. Marka aad qaadanayso dawada laguu qoray, waa inaad qabataa farsamiga ku jira Passport oo aad tustaa kaadhkaaga aqoonsiga xubinta.

## Miyaad doonaysaa inaad ogaato hadii farmasiga uu ku jiro Passport?

Soo hadal ama booqo [passporthealthplan.com](https://passporthealthplan.com).

## Miyaad doonaysaa inaad ogaato hadii dawadaada ama dawooyinka aad qaadayso la bixiyo?

Soo hadal ama booqo [passporthealthplan.com](https://passporthealthplan.com).

- Dawooyin cusub ayaa mar kasta soo baxa, oo liisku wuu is badali doonaa.

## Waxyaabaha ay tahay in La Ogaado:

- Adigu waxa aad qaadan kartaa ilaa 30 maalmood dawooyin kugu filan markiiba.
- Dawooyinka qaar sida joogtada ah loo qaado, waxa aad qaadan kartaa ilaa 90 maalmood.
- Waxa aanu bixinaa dawooyinka aan la qarin qaar oo uu dhakhtarku qoro.

# Dooro Passport!

Waxaa jira sababo faro badan oo wanaagsan oo aad u dooran karto Passport. Passport waxa uu bixiyaa WAXKA BADAN caymis caafimaad. Marka loo yimaado wanaagaayaga iyo naxariistaayada, waxaad nagu xisaabtami kartaa in aanu kuu fufudayno talaabo kasta!

Dooro Passport oo waxa aad sugtaa caymiskaaga caafimaadka adiga iyo qoyskaagu helayaan. Nagala soo hadal **1-844-778-2700** si aad u bilawdo nidaamka ku biirista maanta! Istimaalayaasha TTY waxay soo waci karaan **711**.





**PASSPORT  
HEALTH PLAN**  
BY MOLINA HEALTHCARE

**Xubaha Passport-ga Wakhtigan:**  
**Lahadal 1-800-578-0603**  
(TTY isticmaalaha 711)

**Ma waxaad rabtaa inaad Ku  
Biirto Passport?**  
**Lahadal 1-844-778-2700**  
(TTY isticmaalaha 711)

Wixii macnuumaad kale ee ku jira qoraalkan looguma talo gelin inuu beddelo daryeelka caafimaad ama tallada dhakhtarkaaga. Wixii tixraacyo ah ee shirkadaha kale ama goobaha internetka maaha tageero ama amaanada adeegyada, macluumaadka ama alaabta la bixiyay. Passport malaha masuuliyada wixii ka yimaada isticmaalka, si khalad ah u isticmaalka, turjumaadda ama ku dabaqidda macluumaadka waraaqahan. Passport ma damaanad qaado helitaanka ama tayada daryeelka. Kama masuul nihin wixii fal ah ama ka saarid ah wax adeeg bixiye ah. Dhamaan bixiyayaasha heshiiska kula jira Passport waxaa weeye qandaraaslayaal madax banaan oo uma shaqeyaan ama wakiil uma aha Passport.